

Qaab dhismeedka iyo shaqooyinkooda geedka(Treets deler og funksjoner)

Dhirtu waxay ka mid yihiin noolaayaasha . Dhirta waxa loo qaybin karaa kuwa bixiya ubax iyo kuwa aan bixin ubax. Casharkan waxa aan ku eegeynaa xubnaha qaybaha geedka iyo shaqooyinka ay xubnahaasi geedka.

Dhirtu waxay ka mid yihiin noolaayaasha . Dhirta waxa loo qaybin karaa kuwa bixiya ubax iyo kuwa aan bixin ubax. Casharkan waxa aan ku eegeynaa xubnaha qaybaha geedka iyo shaqooyinka ay xubnahaasi geedka u qabtaan. Geedka waxa aynu u qaybin karnaa laba qaybood , qaybta dhulka ka saraysa iyo qaybta dhulka ku jirta. Qaybta dhulka ku jirta waa xididka , qaybta dhulka ka saraysaana waa jirrida, caleemaha iyo ubaxa.

Xubnaha geedka

Xididka



Xigasho: <https://www.pexels.com>

- Waxa uu geedka ku dhidbaa dhulka.
- Waxa uu ka soo nuugaa dhulka cusbada macdanta ah iyo biyaha.
- Dhirta noocyo ka mid ahna waxa uu u kaydiyaa cuntada, tusaale ahaan dabacasaha.

In kasta oo xididka caaradiisu jilicsan tahay, haddana waxa uu ka dusi karaa dhul adag. Taasi waxa u sabab ah gaska ka baxa xididka oo siidaaya asiidh. Asiidhaasi waxa ay u suurto gelisaa xididka inuu milo macdanta ciidda iyo dhagaxaanta qaarkood. Unugyada xididku waxay sii daayaan kaarboon laba-ogsaydh, CO_2 , oo ka yimid neefsashada unugyada nool ee xididka. Kaarboon laba-ogsaydhku waxa uu la falgalaa biyaha waxaana ka samaysa iskudhis ah asiidh daciif ah, magaciisana la yidhaa kaarboonik asiidh, H_2CO_3 . Iskudhiskaas ayaana u sabab ah milmidda aan kor ku sheegnay.

Jiridda



Sawirka labaad. Pixabay.com

- Waxay tiirisaa kuna yaalla caaleemaha, midhaha iyo ubaaxyaada.
- Waa marin ay sii maraan biyaha iyo iyo macdanta ay xididdadu soo nuugeen una socda caleemaha


- Waxay kaydisaa cuntada, sida jiridda basasha, baradhada iyo toonta.
- Waxa mara cuntada caleentu samaysay ee u socota geedka qaybihiisa kale.
- Waxay ka qaybqaataan taranka jinsi laawaha ee dhirta qaarkood ku tarmaan.

Dhirta inteeda badan jirridoodu dhulka way ka sarreysaa hase yeeshee waxa jira geedo jirridoodu dhulka ku aasan tahay, sida sinjibiisha, toonta iyo basasha. Waxa ay jirridahani kaga duwan yihiin xididdada oo lagu garan karaa iyagoo leg xubno kutimo.

Caleenta

Waa xubinta u soo saarta geedka cuntada. Caleentu waxa ku jira walac u samaysa midibka cagaaran . Walaxdaa waxa lagu magacaabaa cagaariye. Caaleentu Waa goobta uu ka dhaco footoosintasisku. Footoosistasisku waa falagal kimikeed oo geedku ku samaysto cunto. Cuntadaasi waa sonkor magaceeda la yidhaa gulukoos. Waxa uu falgalkaasi dhex maraa kaarboon laba.oksaydh iyo biyaha.

Kaarboon laba-oksaydh + biyo + ilays ==> gulukoos + oksajiin.



Layli

Ka jawaab weedhahan adoo weedho dhan adeegsanaya:

1. Magacaw xubnaha geedka ee dhulka ka sarreeya
2. Sheeg qaar ka mid shaqooyinka xididka
3. Maxaa lagu ka sooci karaa xiddidad iyo jirridaha dhulka ka hooseeya?
4. Footoosintasisku ma dhacaa dhammaan caleemaha dhirta kala duwan?